



Su`aalaha Badanaa La is weydiyo

Waa maxay tirakoobka ardaygu?

Dhammaan waanu tirinaynaa: Tirakoobka Ardayga HWDSB waa su`aalo weydiin arday oo mutadawacnimo ah qarsoona taasoo weydiin doonta su`aalo ku saabsan aqoonsiga (sinjiga, jinsiga, iyo wixii lamid ah) si loo ogaado waxna looga qabto caqabadaha hanaanka kujira.

Maxay waydiinaysaa

Ayadoo ay ku xirantahay da`da ardayga suaalaha ku jira tirakoobku waxay waydiin karaan wax ku saabsan luuqada ardayga, halka uu asal ahaan kasoo jeedo, isir, sinji, diin, aqoonsiga jinsiyada, rabitaanka galmada, curyaanimada, goobta dhalashada, iyo xaaladda muwaadinimada/soogalootinimada.

Qaabka yagu wuxuu uu la jaanqadayaa heerarka xogta ka hortagga cunsurinimada lagu aasaasay Xeerka Ka hortagga cunsuriyadda, ayada oo hadafku yahay aqoonsiga iyo wax ka qabashada sinaan la`aanta kajirta fursadaha ardayga iyo natiijooyinka guulaha. Si aad u aragto foomka tirakoobka, fadlan bookho www.hwdsb.on.ca/weallcount.

Maxay tahay sababta ay HWDSB u samaynayso tirakoobka ardayda?

Guddiyo dugsiyeedyo badan ayaa sameeyay tirakoobka ardayda. Dhab ahaantii, [Xeerka Ka hortagga Cunsuriyadda \(Anti-Racism Act, 2017\)](http://www.hwdsb.info/36SHsul) ([hwdsb.info/36SHsul](http://www.hwdsb.info/36SHsul)) iyo [Qorshe howleedka Sinaanta Waxbarashada ee Ontario \(Ontario's Education Equity Action Plan\)](http://www.hwdsb.info/2Lwie2) ([hwdsb.info/2Lwie2](http://www.hwdsb.info/2Lwie2)) waxay uga baahan yihiin guddiyada dusigu in ay soo aruuriyaankana soo warbixiyaan xogtaan. Guddiga Xuquuqul isnsaanka Otario (Ontario Human Rights Commission (OHRC)) wuxuu ogaaday in xog aruurintaasu ay kaalin muhiim ah ka ciyaari karto

curiosity • creativity • possibility

curiosity • creativity • possibility



abuurista natiijooyin loo simanyahay iyo istaraatiijiyad dhanka xaquuqul insaanka ah ayda oo ka caawinaysa ururka ogaanshaha firaaqa kajira adeegyada.

Marka la joogo HWDSB, tirakoobku waa mid kamid ah mashruucyada muhiimka u ah [Qorshe howleedka yaga Sinaanta\(Equity Action Plan\)](https://www.hwdsb.info/equityplan) ([hwdsb.info/equityplan](https://www.hwdsb.info/equityplan)) Xogtu waxay naga caawin doontaa in aan fahamno baahiyaha ardayda iyo qoysaska, in aan ogaano, waxna ka qabano caqabadaha hanaanka kajira, aana samayno go`aan aan ka dheragsanahay kaasoo abuuraya natiijooyin loo siman yahay.

Sidee ayey u dhici doontaa?

Ardayda fasalka xaadirta – Xanaanada caruurta ilaa Fasalka 4: Arday kasta wuxuu guriga u qaadan doonaa nuqul ka mid ah foomka tirokoobka, oo ay ku jirto warqadaan. Waalidiintu waxa ay buuxin doonaan foomka tirakoobka badalka cunugooda waxayna ku soo celinayaan warqada foomka tirakoobka iskuulka. Hadii ay doortaan inay ka dhamaystiraan foomka tirakoobka online-ka, waxay isticmaali karaan linki-ga amaanka ah ee la siin doono. Fadlan dhamaystir hal kaliya hal xabo oo foomka tirokoobka ah ardaygiiba(online-ka ama daabacaada).

Ardayda aan fasalka tagin – Xanaanada Caruurta ilaa Fasalka 4: Waxaan qoysaska u soo diri doonaa email link-ga amaanka ah ee foomka tirakoobka sidaas darteed ay ka dhamaystiri karaan foomka tirakoobka online-ka badalka cunugooda. Nuqulada daabacan waa diyaar waxaad ka codsan kartaa macalinka cunuga. Fadlan dhamaystir hal kaliya hal xabo oo foomka tirakoobka ah ardaygiiba(onleen-ka ama daabacaada).

Ardayda kuwa fasalka taga iyo kuwa aan tagin – Fasalka 5 ilaa 12: Waxaan iimayl ugu soo diri doonaa link(lifaaq) amaan ardayda fasalada 5 ilaa 12, sidii ay si onleen ah ugu dhammaystiri lahaayeen foomka inta lagu jiro wakhtiga fasalka, ayaka oo taageero ka helaya macalinka.

curiosity • creativity • possibility

curiosity • creativity • possibility

HWDSB



Nuqulada daabacan waa diyaar waxaad ka codsan kartaa macalinka cunuga. Fadlan dhamaystir hal kaliya hal xabo oo foomka tirakoobka ah ardaygiiba(online-ka ama daabacaada).

Sidee xogta loo isticmaali doonaa?

Waxaan xogta u isticmaali doonaa si aan u fahamno sida uu u samaysan yahay dadweynaha ardayda ah ee HWDSB, iyo in aan soo saarno warbixino ku saabsan guusha ardayga, fursadaha, iyo ka qaybqaadashada qorshaynta. Anaka oo ogaanayna waxa socda iyo firaaqa jira, waxaan awoodi doonaa in aan aragno kooxaha kuwa ku badan iyo kuwa ku yar matalaadda qaybo cayiman. HWDSB waxay falanqaynta waxyaabahaan socda u isticmaali doontaa si ay diiradda u saarto shaqadeeda sare u qaadidda xaaladaha dugsiga, ciribtirka dhaqamada cunsuriyadda ah iyo ka saaridda meesha caqbadaha ku hor gudban guusha ardayga. Waxaan si cad uga warami doonaa natiijooyinka tirakoobka iyo sida xogtaan ay uga caawisay jahaynta barnaamijyada, istiraatiijiyadaha, siyaasadaha, dhaqamada, ilaha, iyo kaalmooyinka HWDSB.


Sidee ayay HWDSB u ilaaliyaan macluumaadka shakhsiga?

HWDSB waxaa ka go`an heerka ugu sareeya ee dhowrsanaanta iyo qarsoonaanta marka ay aruurinayaan macluumaadka ku saabsan ardayda iyo qoysaska. Tirakoobka ardayda waxaa lagu aruurinayaa ayada oo la raacayo Xeerka Kahortagga Cunsuriyadda(Anti-Racism Act, 2017, S.O.). 2017, c. 15, Xeerka Waxbarashada(Education Act, R.S.O.). 1990, c. E.2, waxaana loo hogaansamayaa Xeerka Ilaalinta Dhowrsanaanta iyo Xuriyadda Macluumaadka ee Dowlad deegaanka(Municipal Freedom of Information and Protection of Privacy Act, R.S.O.). 1990, c. M.56.

Tirakoobka ardaydu waa mid qarsoon, laakiin ma ahan mid sir ah. Jawaabaha gaargaarka ah ee ardayda ayaa la isu gaynayaa si loo falanqeeyo si macluumaad arday gaar ah aan marna loo aqoonsan. Jawaabaha la aruuriyay waxaa lagu kaydin doonaa xarun xogta lagu kaydiyo oo ah

curiosity • **creativity** • **possibility**

curiosity • **creativity** • **possibility**



mid amaan ah, oo qarsoon waxaana kaliya heli kara shaqaalaha Falanqaynta & Cilmibaarista HWDSB ee loo fasaxay si ay u ogaadaan una soo koobaan waxa ka dhex socda ardayda HWDSB.

Ma waajibbaa?

Dhammaystirka tirakoobku waa mutadawacnimo. Si kastaba ha ahaatee, waxaanu ardayda weydiinaynaa in ay ka qaybqaataan si aan sawir sax ah uga helno bulshada ardayda yada ah. Jawaabaha faraha badan waxay naga caawinayaan in aan ogaano caqabadaha, aan samayno istaraatiijiyado, aana wax ka qabano caqabadaha hor taagan guusha ardayda iyo badqabkooda kuwaas ay ku qabaan barnaamijyadeena iyo ilaheena. Qoysaska aan doonayn in canuggoodu uusan ka qaybqaadan waa ay ka bixi karaan ayaka oo isticmaalaya foom kujira Bogga Waalidka(Parent Portal).

Sidee tirakoobka ardayda HWDSB loo sameeyay?

Su`aalaha tirakoobka ardayga HWDSB waxaa ay la jaanqadayaan muunadda su`aalaha kujira Heerka Ka hortagga cunsurinimada ee Xeerka Ka hortagga cunsuriyadda. Su`aalahaan waxaa loo isticmaalayaa aqoonsiga iyo wax ka qabashada sinaan la`aanta kajirta fursadaha ardayga iyo natiijooyinka guulaha. Marka gudaha la eego, tirakoobka waxaa lagu hagayaa dadaal fara badan oo ka imaanaya ardo fara badan oo kala duwan, qoysaska, shaqaalaha, iyo xubnaha bulshada. Waxaan samaynay la tashiyo si aan usoo aruurino falcelinada bulshada waxaana raacnay qaababka ugu wanaagsan ee qorshaynta tirakoobka ardayda, horumarka, falanqaynta, iyo adeegsiga natiijooyinka.


Goorma ayaan arkayaa natiijooyinka?

Kaddib markii tirakoobka la sameeyay Abriil 2021, shaqaalaha cilmibaarista iyo falanqayntu waxay falanqayn doonaan xogta waxayna si cad warbixin usoo celin doonaan Noofambar 2021.

curiosity • **creativity** • **possibility**

curiosity • **creativity** • **possibility**

HWDSB



HWDSB waxay ardayda iyo qoysaska ogaysiin doontaa go`aanada laga sameeyay xogtii laga aruuriyay tirakoobkii ardayda.

Su`aalo ma qabtaa?

Marti qaad ayaan samaynaynaa su`aalana waan ka jawaabaynaa inta aan u diyaar garoobayno tirakoobka. Fadlan wax badan ka ogow websaytka yaga www.hwdsb.on.ca/weallcount, halkaas oo aad ka heli doonto su`aalaha inta badan la isweydiyo (Frequently Asked Questions (FAQs)) ee ku saabsan tirakoobka. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa kooxda yada tirakoobka ardayda census@hwdsb.on.ca.

Tirakoobku ma heli karaan ardayda qabta baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah?

Haa. Ayada oo ay ku xiran tahay baahiyaha ardayha, waxaan siin doonnaa fududaynta lagama maarmaanka ah sida tiknoolojiyadda taageeraysa iyo tan kaalmaynaysa si arday kasta uu uga qayb qaato. Shaqaalaha taageerada sida caawiyeyaasha dhanka waxbarashadu waxay sidoo kale kaalmada u bixin doonaan sidii looga baahnaa. Waxaan diyaarin doonnaa taageerada si qoysasku ay u dhammaystiraantirakoobka ayaka oo matalaya ardayda ay baahidooda waxbarashada gaarka ah ay caqabad ku tahay in ay ayaku buuxsadaan warqadadooda ra`yi uruurinta.

Tirakoobku ma lagu helayaa luuqad aan Ingiriis ahayn?

Haa, tirakoobku wuxuu ku diyaarsan yahay luuqadda Faransiiska iyo 10 kamid ah luuqadaha ugu badan ee lagu sheegay HWDSB. Arabic, Chinese, Farsi, Karen, Kurdish, Korean, Somali, Spanish, Urdu and Vietnamese. Akhriska maqalka ah ayaa u diyaarsan qoysaska leh caruurta kujirta xanaanada caruurta ilaa Fasalka 4aad, iyo Kuwa barta Luuqadda Ingiriiska ee kujira fasalada 5 ilaa 12 kuwaas oo leh aqoonta luuqadahaan oo xaddidan. Luuqadaha kale, qoysasku waxay dalban karaan tarjumaano, shaqaalaha SWIS iyo/ama bareyaalayagoo iimayl u diraya census@hwdsb.on.ca ama la xiriiraya dugsiga.

curiosity • **creativity** • **possibility**

curiosity • **creativity** • **possibility**

HWDSB



curiosity • **creativity** • **possibility**

curiosity • **creativity** • **possibility**